# Maktabadda Ismaamulka San Diego

SIYAASADA ABUURISTA KAYDKA

**WARBIXINTA AASAASIGA AH**

Maktabadda Ismaamulka San Diego waxay ka shaqeysaa baahiyaha danaha xogta, waxbarashada, iyo maslaxada guud ee lagu bixiyo 33 maktabadaha dadweynaha ah, shan (5) dukaamada yaryar ee Maktabadda MySDCL, gaariyaasha wareegga ee gaarsiinta adeegyada, iyo Xafiiska Maamulka. Aagga adeegga ee SDCL ayaa ka kooban kow iyo toban (11) magaalooyinka waawayn ah iyo qaybta miyiga ee Ismaamulka San Diego, California. SDCL ayaan lahayn Maktabad Guud, ma lahan laamo ka farcamay, waxayna keliya ugu adeegtaa macaamiisheeda maktabaddaha magaalooyinka waaweyn, tuulooyinka, iyo laamaha miyiga.

Kaydka SDCL ayaa taageeraya higsiyada soo socda ee istaraatiijiga ah oo ku qeexan qorshaha istaraatiijiyada ee maktabadda:

- Kor u qaadista waxbarashada
- U qareemida shaqada madaniga ah
- Dhiiri gelinta wax akhriska
- Naqshadeynta fursadaha si looga faa'iideysto dhaqanka iyo farshaxanka

**UJEEDADA**

Siyaasada abuurista kaydka ayaa u adeegaysa shaqooyin badan. Waa naqshada shaqada ee kobaca iyo hormarinta kaydka maktabadda. Waxay naga caawisaa inaan shaqaalaha Hormarinta Kaydka diirada ku saarno shaqada SDCL. Waxay ku wargelisaa shaqaalaha maktabadda, dadwaynaha, iyo iskaashatadeena mabaadii'da hagaysa kaydkeena. Waxay taageertaa mabaadii'da xoriyada xogta oonleenka ah, taasoo ah helitaanka noocyada kaladuwan ee fikradaha iyo xogta ay helayaan dadka oo dhan. Waxay bixisaa hanaanka xalinta cabashooyinka macaamiisha maktabaddu ka qabaan kaydka.

## DIIRADA KAYDKA

SDCL waa maktabadda alaabaha caanka ah taasoo diirada saarta khayraadka cusub ayna bulshadu aad u danaynayso. Kaydka maktabadda ayaa ka kooban fikradaha kaladuwan iyo noocyada kaladuwan ee bulshada, dhaqaalaha, iyo dhaqanka ee gobalka. Maktabadda waxaa sidoo kale yaala kaydka alaabaha taageeraya xogta aasaasiga ah iyo baahiyaha waxbarashada nolosha oo dhan ee bulsho waynta, xataa meelaha aan aadna looga aqoon. Baahiyaha waxbarashada ayaa laga taageerayaa ardayda fasallada K-12 taasoo kabis u ah maktabadda dugsiga, ee aan ku filnayn. Baahiyaha ardayda waxbarashada jaamacadaha ayaa la taageerayaa marka ay ku beegmaan aagaga kale ee adeegyada. Baahiyaha akhriska iyo cilmi baarista ee aan lagu buuxin kaydka ayaa lagu heli karaa heshiisyada ururada iyo buug kala caariyaysiga maktabadaha.

## MASUULIYADA XULASHADA

SDCL waxay leedahay Waaxda Abuurista Kaydka, kana kooban xirfadlayaasha shaqaalaha maktabadda, kuwaasoo masuuliyadooda koobaad tahay xulashada alaabaha la gelinaayo kaydka oo dhan, marka laga reebo kuwa hoos ku qoran.

- Joornaallada - waxaa doorta shaqaalaha laanta
- Kaydadka xogta - waxaa doorta gudi ka kooban shaqaalaha maktabadda ayagoo maraaya hanaanka iibinta kaydadka oo loo tartamaayo
- Saaxiibada Gaarka ah ee kooxaha Maktabadda ayaa sidoo kale doorta oo soo iibiya buugaagta leh isticmaalka xadidan ee ku cayiman wakhti gaar ah

## SHURUUDAHA XULASHADA

<u>Shuruudaha Guud</u>

- Baahida bulshada ee hadda ama mustaqbalka ama dalabka
- Dib u eegista la door bideeyo ee xogta xirfada ama caanka ah
- Aqoonta iyo/ama sumcada qoraaga, farshaxaniistaha, ama daabacaha
- Helitaanka biladaha abaal marinnada waawayn
- Saxnaanta
- Wakhtiga
- Doorka ay ka qaadanayso kaydka maktabadda
- Doorka ay qaadanayso isku dhafka kaydka
- Ku haboonaanta qaabka ee isticmaalka maktabadda
- Tayada wax soo saarka

- Ku haboonaanta macaamiisha loogu talo galay
- Qusaynteeda bulshada
- Qiimaha
- Xadidaadaha boosaska banaan
- Nooca dhagaysiga ee agabka oonlaynka ah

**Dalabka –** Maktabadda ayaa soo iibsata nuqullada dheeraadka ah ee buugaagta si ay u yareyso wakhtiga sugitaanka buugaagta ee codsiyada macaamiisha. Yoolka SDCL waa in la helo wakhtiga sugitaanka oo dhan sadex bilood ama kayar.

**Codsiyada Iibsiga** – SDCL ayaa tixgelisa agabka ay codsadaan labadaba macaamiisha iyo shaqaalaha. Agabka lagu talinaayo ayaa la marsiin doonaa isla shuruudaha xulashada ee dhammaan agabka kale ee Maktabaddu xulato.

**Qaababka** – Maktabadda ayaa soo uruurisa agabka leh noocyada kaladuwan ayna ku jiraan kuwa daabacan, codka ama muuqalaka ah, iyo kuwa oonlaynka ah. Qaababka ayaa lagu go'aamiyaa dalabka bulshada, muddada ay jirayaan, helitaankooda, iyo macquulnimada qiimahooda. Noocyada cusub ee agabka elektarooniga ah iyo kan casriga ah ayaa si joogto ah loosoo geliyaa suuqa. Maktabadda ayaa qiimeysa nooc kasta si taxadar leh si ay u qiimeyso ku haboonaantooda isticmaalka bulshada maktabadda. Wakhti ku filan ayaa badanaa loo baahan yahay si qaab wanaagsan loogu go'aansho in ay heli doonaan aqbalaada muddada dheer ee baahda ee dadwaynaha, kahor inta aan la go'aamin noocyada lagu daraayo kaydka. Qaababka wakhtiga hore soo baxay ayaa la dhimaa marka dalabaadka bulshadu hoos u dhaco.

**Isku dhafka** – SDCL waxay heegan ugu jirtaa bixinta kaydadka agabka ka turjumaaya bulshadeena sidoo kalena u sahlaaya akhristaha inuu fahmo fikradaha iyo khibradaha dadka kale. Waxaan aqoonsan nahay in, taariikhiyan, farsamooyinkeena xulashadu aysan waafaqsanayn isku dhafnaanta bulshada Ismaamulka San Diego. Tan ayaa keentay kayd aan si ku filan uga turjumayn bulshadeena. SDCL ayaa qaadaysa tallaabooyin si ay u xaliso arrintaan ayadoo 1) xaqiijinaysa in tiro badan oo kamid ah agabka lasoo iibinaayo diirada lagu saaro bulshooyinka aan helin matalaad ku filan, 2) dib u soo iibsanaysa nuqullada buugaagta hore, laakiin ku haboon, marka ay ka dhamaadaan lagana saaro kaydka. Awooda ayaa la saarayaa buugaagta ay sameeyeen dadka bulshada la wadaaga fikradaha ama sifooyinka ka muuqda shaqooyinkooda. Hase yeeshee, shirkadaha daabacaada ayaan shaqadooda ku saleyn bulshada, degmadeena, gobalkeena ama wadankeena. Inta shirkada daabacaadu ka shaqeynayso hormarinta matalaada bulshada, waxaan filaynaa in marka isbadeladaan lagu daro dedaaladeena, aan gaari karno kayd si wanaagsan uga turjumaaya bulshadeena sanadaha soo socda.

**Luuqadaha Aduunka** – Guddiga Kormeereyaasha ee Ismaamulka San Diego ayaa u qoondeeyay luuqadaha leh in ka badan 5,000 oo qof oo ku hadashada Ismaamulka dhexdiisa si ay u noqdana luuqadaha diirada la saaro. Si waafaqsan dedaalka SDCL ee siinta agabka qof kasta, Maktabadda ayaa iibsanaysa agabka ku qoran luuqadaha muhiimad ala saaraayo marka la heli karo. Waxaa intaas dheer, SDCL ayaa uruurinaysa agabka ku qoran luuqadaha kale ee hadda ay adeegsato bulshadu, ay muuqato baahi loo qabo, lana heli karo si loo soo iibiyo.

**Kaydadka Carruurta iyo Dhalinta yaryar** – Maktabaddu waxay raadinaysaa inay bixiso kayd diirada saaraaya khibradaha kaladuwan ee carruurta iyo dhallinyarada bulshadeena waxayna waxayna u sahlaysaa inay baaraan aduunyada iyo waxyaabaha ay daneynayaan. Heerka loogu talo galay akhriska iyo kobacu waa ilmaha dhashay ilaa fasalka 6-aad si loogu daro kaydka carruurta iyo fasallada 7 ilaa 12 oo lagu daraayo kaydka dhalinyarada yaryar. Hase yeeshee, heerarka akhriska iyo kobaca waa cabiro gaar ah, waxaana bixisa maktabadda ayadoo lagu saleynaayo tallooyinka daabacaha iyo dib u eegisyada xirfadyahannada. Maktabaddu waxay ku talinaysaa in waalidiinta iyo masuuliyiintu la akhriyaan buugaagta ilmahooda si ay u go'aanshaan inay daboolayaan baahiyahooda.

Kaydka waxaa ku jiri kara agabka dooda abuuraaya ama ay aflagaadada u arkaan dadka qaar. Maktabaddu ma xadido xoriyada akhriska ama kuma shardiso macaamiisha da'. Waalidiinta iyo masuuliyiinta ayay masuuliyad ka saaran tahay inay hagaan ayna jiheeyaan akhriska, dhagaysiga, iyo dookhyada daawashada ee ilmahooda.

**Tixraaca** – Maktabadda Ismaamulka San Diego waxaad ka helaysaa kaydadka balaaran ee tixgraaca oo yaala laamaha El Cajon iyo Vista iyo sidoo kale kaydadka tixraaca ee yaryar oo ku yaala laamaha xaafadaha. Agabka tixraaca ayaa caadiyan ku kooban isticmaalka gudaha maktabadda aana la ogolayn in laga bixiyo goobta.

**Taariikhda Maxaliga ah** – Laamo badan ayaad ka helaysaa kaydadka buugaagta ka hadlaaya taariikhda bulshada maxaliga ah iyo taariikhda dabiiciga ah ee gobalka. Kaydadkaan waxaa ku jira agabka muddada kooban, kuwa cilmiga, iyo kuwa qaaska ah iyo qaabab laga reebay kaydka caadiga ah. SDCL waxay sidoo kale leedahay kaydka oonlaynka ah ee taariikhda maxaliga ah. Arag "*Kaydka Taariikhda Maxaliga ah ee Oonlaynka ah*" si aad u hesho xog dheeri ah.

**Ilaalinta Bii'ada** – Higsiga Ismaamulka San Diego ee ilaalinta bii'ada ayaa naga codsanaaya inaan ilaalino mustaqbalka gobalkeena, anagoo ilaalinta bii'ada siinayna muhiimadaha ugu waawayn ee shaqadeena aadna ugu xiran dhaqankeena. Waxaa intaas dheer, SDCL ayaa xubin ka ah Mashruuca Maktabadda Ilaalinta Bii'ada

waxayna ka taageertaa Ismaamulka dedaaladeeda kor u qaadista nolosha deegaanka. Tan waxaa ku jira inaan iibsano kaydka buugaagta masaalixda guud ee ku saabsan mawduucyada bii'ada quseeya, anagoo ku darayna dukumiintiyada gaarka ah ee ay ku talinayaan Xafiiska Ismaamulka ee Ilaalinta iyo Cadaallada Bii'ada iyo haayadaha kale ee dawlada.

Dedaaladeena kordhinta ku haboonaanta ilaalinta bii'ada ee kaydkeena waxaa kamid ah abuurista kaydka oonleenka ah, kaydadka guurguura, hormarinta kaydka dhexe, dib u iibinta ama dib u naqshadeynta agabka duqoobay, iyo inaan si firfircoon u uruurino una hormarino kaydka isku dhafan ee ka turjumaaya bulshadeena. Waxaa intaas dheer, SDCL ayaa maamusha kaydka si loo xaqiijiyo in uu ka turjumaayo masaalixda bulshada ayadoo la adeegsanaayo noocyada kaladuwan ee bulshada anagoo adeegsanayna xogta kaladuwan, ayna ku jiraan tirada macaamiisha, ishdaafsiga, iyo fikradaha macaamiisha.

**Kaydka Akhriska iyo Qoraalka** – Maktabaddu waxay soo iibsataa agab si loo taageero barnaamijka barashada Akhriska iyo qoraalka ee dadka waawayn ee SDCL, Ingiriiska oo ah Luuqada Labaad (ESL) iyo barista dadka waawayn akhriska. Agabka waxaa ku jira buugaagta waxbarashada iyo xogta la xiriirta akhriska, qoraalka iyo fahanka, iyo sidoo kale buugaagta sheekooyinka mala awaalka ah iyo kuwa runta ah ee ay dadka waawayn ee wax baranaaya akhrin karaan. Kaydka Maktabadda waxaa ku jira agab yaala keliya kaydadka helitaankoodu xadidan yahay, iyo sidoo kale, kaydka guud.

**Iskaashatada Ururka** – SDCL waxay xubin ka tahay iskaashiyada ururada buugaagta is daymiya, Circuit iyo Link+. Circuit waa iskaashi u dhexeeya maktabaddaha dadwaynaha iyo kuwa jaamacadaha ku yaala San Diego. Link+ waxaa ku jira maktabadaha dadwaynaha iyo kuwa jaamacadaha ee dhammaan gobalka California. Anagoo adeegsanayna iskaashiyadana, SDCL ayaa awooda inay diirada saarto kaydka ballaaran ee ay helayaan bulshada deegaankeena, ayadoo haddana wali siinaysa noocyada balaaran ee buugaagta iyo waxyaabaha ay danaynayaan.

**Qoraayaasha maxaliga ah ee buugaagtooda ayagu daabacda** – Maktabadda ayaa iibsata buugaagta maxaliga ah ee qoraayaashu daabaceen marka ay buuxiyaan shuruudaha xulashada ee ku qoran siyaasadaan. Hase yeeshee, deeqaha halka nuqul ee shaqada qoraayaasha maxaliga ah ee Ismaamulka San Diego ama farshaxaniisteyaasha, ayaa loo aqbalayaa dib u eegis xataa haddii aysan buuxin shuruudaha caadiga ah ee iibsiga. Halka nuqul ee buuga ayaa lagu daraya amarka uu buuxiyo shuruudaha ugu yar ee saxnaanta, tayada, wakhtiga, iyo qaabka. Sababaha ugu badan ee aan loogu darin agabka maxaliga ah waxaa kamid ah:

- Buugaagta ay isku hayaan badhannada ama bir qabatada
- Bogaga aan la arkayn (bogaga midab leh, bogaga jeexeexan, iwm.)
- Qisooyinka wakhtigoodii dhacay
- Sheekooyinka ka hadlaaya mawduucyada ay qoreen dadka aan haysan cadeynta saxda ah
- Khaladaadka xad dhaafka ah ee naxwada

**Deeqaha** – Maktabadu waxay aqbashaa deeqaha lacagta ah si ay u kordhiso kaydka, kuwaasoo loo cayimi karo macaamiil gaar ah ama noocyo gaar ah oo agabka kamid ah. Codsiyada buugaagta gaarka ah ayaan la aqbali karin. Qoondeynada waa inay ansixiyaan shaqaalaha Hormarinta Kaydka kahor inta aan la aqbalin.

Deeqaha agabka caadiga ah ayaan la aqbalayn si loogu daro shardi dhaafka kaydka marka aysan ku jirin kuwa horay loogu fasaxay in lagu daro agabka kaydka ee ay bixiyaan adeeg bixiyaasha rasmiga ah ee agabka Maktabadda. Dhammaan shardi dhaafyada waa inay ansixiyaan shaqaalaha Hormarinta Kaydka.

Qaar kamid ah tusaaleyaasha agabka la aqbali karo waxaa kamid ah:
- Buugaagta ay qoraan qoraayaasha maxaliga ah
- Buugaagta quseeya Ismaamulka San Diego
- Agabka luuqadaha caalamka

Dhammaan deeqaha ayaa noqonaaya hantida kaydka.

## MAAMULKA KAYDKA

Maktabadda Ismaamulka San Diego ayaa leh hal kayd oo wadaag ah oo ay helayaan dhammaan goobaha. Buugaagta gaarka ah iyo nuqullada ayaan loo arkayn hantida goob gaar ah. Sidaas awgeed, baahiyaha nidamaka maktabadda, si guud, iyo baahiyaha gaarka ah ee laanta maktabadda ayaa la tixgeliyaa marka shaqaaluhu samaynayaan maaraynta kaydka.

### Kaydka guurguura

Maktabadda Ismaamulka San Diego ayaa leh kaydka guurguura. Agabka ayaa laga qaadaa laan lana geeyaa laan kale ayadoo lagu saleynaayo codsiyada macaamiisha iyo baahiyaha laanta aag gaar ah. Kooxda Hormarinta Kaydka ayaa xulanaysa buugaagta iyo cadadka ayadoo ku saleynaysa baahiyaha la filaayo ee nidaamka. Agabka ayaa loo qoondeeyaa goobaha hore ayadoo lagu saleynaayo codsiyada macaamiisha, xajmiga waaxda iyo dhaqdhaqaaqa shaqada, iyo danaha bulshada.

**Ka saarista agabka kaydka**
Kaydadka ayaa agabka looga saaraa si joogto ah si looga bixiyo alaabaha aan hadda kadib buuxinayn shuruudaha kaydka, inta badan la sameeyo marka waqtigoodu dhaco, ay duqoobaan, ama marka dalabkoodu yaraado. Agabka la tuuro ayaa dib loo iibiyaa si ay dhaqaale uga hesho SDCL, dib ayaa loogu heshaa daabacaada, ama waxaa la siiyaa waaxaha Ismaamulka iyo ururada bulshada sida ku qoran xeerka Siyaasada O.18 Asturaada Agabka Maktabadda Ismaamulka ee La Nacay.

**Liiska Kaydka**
Liiska agabka Maktabadda ayaa ah diiwaanka saxda ah ee kaydka. Si loo xaqiijiyo in diiwaanku sax yahay, liiska dhammaan agabka kaydka ayaa la sameeyaa sanad kasta. Shaqaalaha ayaa dib u eegis ku sameynaaya qaybta gaarka ah ee kaydka bil kasta, ayagoo ka baaraaya agabka aan dhaqdhaqaaqa samayn labadii sano ee lasoo dhaafay. Liiska dheeraad ah ee tijaabooyinka kaydka ayaa lagu sameeyaa 4 waaxood sanad kasta si loo aqoonsado ciladaha jiri kara.

**Kaydadka buugta la dhigo**
Waaxaha qaar ayaa taageera bulshada ayadoo u sameeya meelo ay buugta ka qaataan, kuwaasoo ku yaala meelo ka baxsan xarunta. Meelaha buugta laga qaato waxaa qalabeeya oo maamula shaqaalaha waaxda, ayadoo lagu saleynaayo galka macmiilka ee Heshiiska Kaydka Buugaagta laga Qaato iyo agabka markaas yaala waaxda. Xarumaha ayaa codsan kara qaab, heer akhris, nooc, ama mawduuc, laakiin codsiyada buugaag gaar ah ayaan la dabooli karin. Agabka ayaa wali ah hantida SDCL waxaana lagu celin doonaa kaydka guud marka ay dhammaato muddada 30 maalmood ah ee caariyada. Si aad u hesho xog dheeraad ah eeg Siyaasada 0.68 Kaydka Bugaagta laga Qaato.

**Baaqiga Kaydka**
SDCL ayaa dib u eegis ku samaysa kaydadka, labadaba nidaamka guud iyo waax kastaba, qaab sanadle ah ama nus sanadle ah si loo go’aansho haddii qayb kasta oo agabka kamid ah ay leedahay xajmiga saxda ah marka loo eego dalabka. Baaqiga kaydka ayaa wax laga badalaa marka loo baahdo, marka ay saamaxayso helitaanka agabka iyo miisaaniyada.

## XORIYADDA GARAADKA IYO XORIYADDA WAX AKHRISKA

SDCL waxay taageeraysaa xoriyadda macluumaadka iyo xaqa qofku u leeyahay inuu wax akhristo, dhegaysto, ama uu dib u eegis ku sameeyo sida asagu uu rabo, asaga oo u isticmaalaya labadaba waxbarasho ahaan iyo madadaalo ahaanba si bilaa xad ah, sida ku cad dukumiintiyada soo socda (eeg Lifaaqyada):

- AB1825 California Freedom to Read Act (Xeerka Xoriyadda Wax akhriska ee California)
- COSD BOS Waxay kahor timid oo Mamnuucday Buugaagta 8-27-24, Lambarka Daqiiqadda Dalbashada. 18

Si waafaqsan Xeerka Xoriyadda Wax akhriska ee California, SDCL wuxuu sidoo kale qirayaa: in kaydku buuxiyo shuruudaha rabitaanada balaaran ee kala duwan ee bulshada uuna ixtiraamo labadaba madaxbanaanida maktabadda iyo baahiyheeda gaarka ah ee bulshada; maktabadda dadweynuhu waxay u taagan tahay xarun si bilaash ah wax la isugu weydiiyo laguna baahiyo macluumaad iyo afkaaro; agabka maktabadda waa in lagu bixiyaa si waafaqsan danaha, macluumaadka, iyo fahamka dadka oo dhan, waana inay kujiraan qodobo kala duwan oo afkaaro ah waxyaabaha guud ahaanba; xaquuqda dadweynaha ee helitaanka adeegsiga afkaaraha iyo waaya-aragnimada kala duwan ee bulshada, siyaasadda, mabaadii'da, qiyamka.

Sidaa darteed, Maktabaddu waxay bulshada Ismaamulka San Diego siinaysaa adeegsiga afkaaro iyo aragtiyo fara badan oo ay ku siinayso agabka Maktabadda iyo heshiisyo amaahasho ah.

**CODSIGA TIXGELINTA AGABKA MAKTABADDA**

Qaar kamid ah agabka ku jira kaydka Maktabadda ayaa noqon kara kuwo dood dhalin kara dadka qaarna waxay u arki karaan kuwo aan ku haboonayn kaydka. Tusaaleyaashaan, isticmaaleyaasha maktabadda ayaa lagu boorinayaa inay kala hadlaan walaacyadooda shaqaalaha maktabadda ee waaxdooda maxaliga ah. Haddii isticmaalaha maktabadu doonaayo dib u eegis dheeraad ah oo lagu sameeyo, shaqaalaha ayaa siin kara **Foomka Codsiga Dib u Eegista Khayraadka Maktabadda** foomka (LIB 03-17).

Marka *foomka Codsiga Dib u Tixgelinta* la helo, waxaa loo diri doonaa Maamulaha Hormarinta Kaydka iyo Gudiga Xoriyada Xogta. Maamulaha Hormarinta Kaydka ayaa sharixi doona kooxda si uu dib u eegis ugu sameeyo agabka dooda laga keenay. Kooxda ayaa akhrin doonta, eegi doonta, ama dhagaysan doonta agabka oo buuxa. Marka la dhameeyo, xogta ayaa laga uruurshaa agabka dooda laga keenay iyo shuruudaha loo adeegsaday xulashada shayga agabkana waxaa lagu qiimeeyaa nuxurka Siyaasada Hormarinta Kaydka. Ayadoo lagu saleynaayo xogtaan, kooxda ayaa u diraysa Maamulka Maktabadda tallo ku aadan agabka doodu ka taagan tahay.

Maamulka Maktabadda ayaa siin doona jawaab qoraal ah macmiilka maktabadda kadib marka shayga dib u eegis lagu sameeyo. Macaamiisha maktabadda ee doonaaya dib u eegista dheeriga ah ee buuga ayaa racfaan ka qaadan kara go'aanka Agaasimaha Maktabadda. Agabka dib u eegisku ku socoto ayaa wali laga heli doonaa kaydka.

Foomamka **Codsiga Dib u Tixgelinta Khayraadka Maktabadda** ayaa la aqbalayaa dibna loo eegayaa marka:

- Codsaduhu yahay qof dagan Ismaamulka San Diego.
- Buugga la codsanaayo in dib loo eego aan lasoo marin hanaankaan 12 bilood ee lasoo dhaafay.

**KAYDADKA OONLAYNKA AH**

Kaydka SDCL waxaa ku jira noocyada kaladuwan ee khayraadka oonlaynka ah sida kaydadka xogta, agabka waxbarashada oonlaynka ah, webseedyada, Buugta elektarooniga ah, buugaagta codka ee lasoo degsan karo,, warbaahinta tooska ah, nuqullada oonlaynka ah ee xogta caadiga ah. Dalabka agabka oonlaynka ah ayaa noqon kara ama aan noqon karin mid waafaqsan nuqulkiisa rasmiga ah. Taas awgeed, kaydka oonleenka ah waxaa ku jiri kara buugaagta, noocyada iyo qaababka aan ku jirin nuqulka waraaqda ah iyo si lamid ah. Kaydadka oonleenka ah ayaa la doortaa ayadoo la adeegsanaayo isla shuruudaha kore, oo leh shuruudaha dheeriga ah ama shardi dhaafyada soo socda:

**Kaydadka xogta**

SDCL ayaa siinaysa macaamiisha khayraadka kaladuwan ee oonleenka ah, kuwaasoo bixinaaya fursadaha mudada dheer ee waxbarashada iyo cilmi baarista. Kuwaani waa qoondooyinka adeegga oo lagu saleeyay khayraadka lacagta lagu baxsho oo maktabaddu dadka dagan Ismaamulka ku siiso si bilaash ah. Shuruudaha dheeriga ah ee xulashada:

- Isticmaalka fudud
- Fikir celin ku aadan tijaabooyinka kaydka xogta
- Tirada isticmaaleyaasha joogtada ah
- Helitaanka oonlaynka ah
- Xiriirka kala dhexeeya xogta kaydka daabacan iyo kan oonleenka ah
- Cabirada isticmaalka

**Webseedyada Banaanka**

SDCL waxaa sidoo kale ku jira tirada kooban ee khayraadka iyo kaydadka xogta ee ku jira webseedka kuwaasoo kaabaaya qoondooyinkeena lacagta ah. Khayraadkaan si taxadar leh ayay u buuxiyaan shaqaalaha Hormarinta Kaydka.

- Xiriirka kala dhexeeya xogta kaydka daabacan iyo kan oonleenka ah
- Cabirka webseedka. Xarumaha u adeegga deegaannada balaaran ee ay isticmaalaan macaamiisha badan ayaa la siiyaa tixgelinta ugu badan
- Aqoonsiga qeexan iyo isku halaynta lagu qabi karo bixiyaasha xogta
- Saxnaanta iyo haboonaanta xogta
- Ku jiritaanka xasiiyiinnada, bogaga soo boodaaya ama wax kale
- Heerka suuqgaynta
- Xarumaha lacagta ka qaada macaamiisha si ay u isticmaalaan qaar ama dhammaan agabka ku jira goobta ayaan lagu darin, ilaa in qaybta bilaashka ah ay badan tahay, xaruntuna aysan adeegsan farsamooyinka suuq gaynta ee xad dhaafka ah si ay ugu dhiiri geliyaan macaamiisha inay lacag ku bixiyaan agabka kale.

**Kaydka Oonlaynka ah ee Taariikhda Maxaliga ah**
SDCL ayaa uruurisa kaydka oonlaynka ah ee taariikhda maxaliga ah ee agabka isha rasmiga ah kasoo baxay, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna sawirada, dukumiintiyada, iyo taariikhaha afka laga sheego, kuwaasoo taariikhiyan muhiim u ah Gobalka Ismaamulka San Diego. Dedaal kasta ayaa la samayn doonaa si loo raadiyo sheekooyinkeena muujinaaya codadka dhammaan dadka ay ka kooban tahay bulshadeenu. Dukumiintiyada qaar ee ku saabsan taariikhda kooxaha takoorka ayaa lagu dari karaa si loogu sameeyo cilmi baaris, laakiin maaha keliya marka ay u jiraan inay kiciyaan iyo/ama abuuraan kala qaybinta bulshada. SDCL ayaa tixgelisa shuruudaha soo socda marka ay dooranayso agabka kaydkaan.

- **Muhiimada taariikhda** – waxay door muhiim ah ka qaadataa diiwaanka taariikhda ee Ismaamulka San Diego
- **Xuquuqda daabacaada** – shay ayaa keliya la tixgelin doonaa haddii uusan ku jirin difaaca xuquuqda daabacaada ama ogolaansho laga qaato daabacada
- **Helitaanka** – oonleen ka dhigista xogta ayaa kordhinaysa helitaanka dadwaynaha ee xogta hadda xadidan. Kaydka oonlaynka ah ee SDCL ayaa lagu baahin doonaa iskaashatada si bulsho badan u helaan una arkaan
- **Helitaanka** agabka ee kaydadka kale ee bulshadu heli karto ee oonlaynka ah
- **Kahortaga** – oonlayn ka dhigista ayaa sugaysa helitaanka agabka kala farirsan. Haddii shay ay qasab tahay in la burburiyo si looga dhigo mid oonlayn ah, sugista ayaa lagu dheelitiri doonaa helitaanka dheeriga ah iyo naadirnimada shayga
- **Mudada jiritaanka** – xogtu ay anfacayso jiilalka soo koraaya
- **Dalabka** – muhiimada ayaa la siin doonaa agabka bulshada guud danaynayso
- **Qaabka** – shaygu uu yahay qaab oonlayn laga dhigi karo. Agabka ayaa la siin karaa muhiimad ayasoo lagu saleynaayo fududeyka ka dhigita oonlayn

- **Isku dhafnaanta** – agabka ayaa gacan ka gaysanaaya baahinta mugga iyo isku dhafnaanta bulshada
- **Taariikhda** – isha iyo xoga qeexitaanka ah ayaa la heli karaa si loo taageero ikhtiraaca iyo isticmaalka agabka
- **Iskaashatada** – iskaashiyada aan la samayno ururada banaanka. SDCL ayaa qaban doonta kaydadka ururada iskaashiga laleh si loo kordhiyo helitaanka dadwaynaha, marka kaydku buuxinaayo shuruudaha la sheegay ee xulashada ay SDCL hayso khayraadka
- **Qiimaha** ay ugu kacayso Ismaamulka
- **maal gelinta** – muhiimada ayaa la siin mashaariicda oonlaynka marka maal gelin gaar ah la heli karo, sida deeqaha ama tabarucaadaha, mashruucuna buuxiyo shuruudaha kore

Agabka ayaa laga saari karaa kaydka oonlaynka ah haddii:
- Xogta loo arko mid aan sax ahayn ama marin habaabin ah
- Ogeysiiska jebinta xuquuqda dabaacaada ama sheegashada beenta ah
- Aysan hadda kadib taariikhiyan muhiim ahayn
- Kaydku uu isbadelay ilaa heer agabka noocaas ah uusan waafaqsanayn shaqada, shuruudaha hormarinta kaydka ama xeerarka lagu sheegay siyaasadaan

Dayactirka

Dhammaan agabka oonlaynka ah waa in loo arkaa agabka oonlaynka ah ee mudada dheer loona ilaaliyaa qaab xaqiijinaaya helitaankooda mudada dheer iyo awooda ay ugu wareegi karaa qaabab cusub.

**LIFAAQYADA**

**XEERKA XORIYADDA WAX AKHRISKA EE CALIFORNIA (2024)**
https://leginfo.legislature.ca.gov/faces/billTextClient.xhtml?bill_id=202320240AB1825

**COSD BOS WAXAY KA HORTIMID OO MAMNUUCDAY BUUGAAGTA 8-27-24 LAMBARKA DAQIIQADDA DALBASHADA 18**
https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/cob/bos-document-search.html

**XEERARKA XUQUUQDA EE MAKTABADDA**
http://www.ala.org/advocacy/intfreedom/librarybill

**XORIYADA AKHRISKA**
http://www.ala.org/advocacy/intfreedom/freedomreadstatement

**XORIYADA DAAWASHADA**
http://www.ala.org/advocacy/intfreedom/freedomviewstatement

(Muraajacada 11/2024)